

## Waxyeellooyinka

Dawooyin badan ayaa leh waxyeellooyin. Waxyeellooyinku waa dhibaatooyin cusub oo dawadu keeni karto. Taasi waxay dhici kartaa xiitaa marka ay dawadu si sax ah u shaqeynayso. Tusaale ahaan, waxa aad qaadan kartaa antibiyootiko si loo bogsiiyo caabuqid ama cudur. Dawadani waxay keeni kartaa lallabo xiitaa marka ay si wacan u wado bogsiiinta caabuqidda ama cudurka.



Waxa muhiim ah inaad ogaatid waxa ay yihiin waxyeellooyinka ay dawadu keeni karto ka hor intaanad bilaabin qaadashada. Marka dhakhtarkaagu kuu qoro dawo cusub, weydii waxyeellooyinka ay keeni karto.

Dawooyinka la iibsano karo warqad dhakhtar la'aan (over-the-counter) (OTC) waxay, iyaguna, yeellan karaan waxyeellooyin. Marka aad iibsatid dawo la iska iibsano karo (OTC), si taxadir leh u akhri qoraalka dawada. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah weydii farmasiilaha.

Waxyeellooyinku waxay caadi ahaan bilaabmaan wax yar ka dib marka aad qaadatid dawo cusub. Waxyeellooyinka dawadu waxay yareyn karaan ama joogsan karaan ka dib 4 ilaa 6 todobaad.



Laba qof oo qaadanaya isku dawo ayaa kala kulmi kara waayo kala duwan. Waxa dhici karta in dumarka ay soo gaadhaan waxyeellooyin ka duwan kuwa ragga soo gaadha.

Dadka qaarkii wax waxyeellooyin ah maba soo gaadhaan. Dadka qaarkii waxay soo gaadha waxyeellooyin fudud ama la maamuli karo. Dad tiro yar waxa soo gaadha waxyeellooyin culus.



Haddii waxyeellooyin kaa soo gaadhaan dawada, u sheeg dhakhtarkaaga. Waxyeellooyinka intooda badani waa kuwo fudud. Laakiin, in tiro yar ayaa halis ah oo laga yaabaa in loo baahan in isla markiiba qofku helo daryeel dhakhtar.

La hadal dhakhtarkaaga haddii dhibaatooyin kaa soo gaadheen dawadaada.

Wixii ah war dheeraad ah ee ku saabsan qoraallada dawooyinka aad iska iibsan kartid warqad dhakhtar la'aan (OTC) ka eeg Qoraallada Dawooyinka OTC.

Wixii ah war dheeraad ah ee ku saabsan dawooyinka dhakhtarku soo qoro ka eeg Qoraallada Dawooyinka Dhakhtarku Qoro.

Wixii ah war dheeraad ah ee ku saabsan qoraallada digniinta ah ka eeg Qoraallada Digniinta ah.